Social Security

Macaashka Hawlgabka

www.socialsecurity.gov

Booqo bartayada internetka

Bogga internetka, ***www.socialsecurity.gov***, waa meel aad macluumaad qiime badan leh iyo dhamaan barnaamijyada Lambarka Bulshada. Boggeena internetka, waxa kale oo aad ka heli kartaa:

- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Waxa aad ka eegi kartaa *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambar Bulshada*);
- Waxa aad ka heli kartaa cinwaanka xaafiisyada Lambarka Bulshada;
- Waxa aad ka codsan kartaa kaar bedelka ee Medicare; iyo
- Waxa aad ka heli kartaa nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno.

Adeegyada aan bixino waxa ay inta badan ku kooban yihiin afka Ingiriisiga

Waxa aad soo wici kartaa Lambarkeena lacag la'aanta ah

Bogeena internetka waxaa kuu dheer in aad naga soo wici akrto telefoonka lavag la'aanta ah **1-800-772-1213**. Telefoonada oo dhan waa qarsoodi Haddii aad ku hadasho afka isbaanishka, doorop 2. Luqadaha kale dooro 1, ama khadka ku jir oo iska aamusnoow inta fariinta afka ingiriisga ah ay socoto ilaa qof kula hadlo oo ka jawaabo telefoonka. Wakiilka kula hadla ayaa kugu xiraya turjubaan kaa caawiya telefoonka. Adeegga turjubaanadu waa lacag la'aan. Waxa aan ka jawaab dhamaanbi karnaa su'aalaha aad qabtaan 7 subaxnimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Guud ahaan, muddo gaaban ayaad sugeysaa in laga jawaabo telefoonka haddii aad soo wacdo todobaadka gudihiisa wixii ka dambeeya talaadada. Macluumaadka waxa telefoonka ku heli kartaa 24 saac ee maalin kasta. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka TTY, **1-800-325-0778**.

Waxaa kale oo aan dooneynaa inaad hesho amcluumaad sax ah iyo adeeg ku raali geliya. Taas weeye sababta telefooada aad soo wacdo loo dhageysto si loo hubiyo in la idiin qabtay adeeg idin raali galiya.

Ki sa ki andedan

Lambarka Bulshada iyo qorshayaasha hawlgabka 4

Macaashka Hawlgabka 4

Macaashka Qoyska 9

Waxyaabaha aad dooneyso in aad ogaato xilliga aad xaqa u leedahay macaashka hawlgabka 12

Fariin ku saabsan Medicare 16

Lambarka Bulshada iyo qorshayaasha hawlgabka

Lambarka Bulshada waa qeyb ka mid ah qorshaha hawlgabka ee ugu yaraan qof kasta oo Mareykan oo shaqeeya. Haddii aad ka mid tahay 96 boqlkiiba shaqaalaha ee ka qeyb qaata Lambarka Bulshada, waa in aad ogaato sida uu u shaqeeyo iyo waxa aad ka heleyso marka aad noqoto hawlgab. Buuggan waxa uu qeexayaa sida aad xaqa ugu yeelaneyso macaashka Lambarka Bulshada, sida dakhliga ku soo gala iyo da'da ay saameyn ugu yeelan karto macaashka, maxaad ka fikireysaa marka aad dooneyso in aad hawlgab noqoto iyo sababta aadan Lambarka Bulshada oo kaliya uga dhigan karin dakhliga hawlgabka.

Buuggan waxa aad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan macaashka naafanimada ee Lambarka Bulshada laakiin looguma talo galin in looga jawaabo dhamaan su'aalaha. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan xaaladaada, waxa aad kala hawli kartaa wakiilka Lambarka Bulshada.

Macaashka Hawlgabka

Sidee ayaad xaq ugu yeelaneysaa macaashka hawlgabnimada?

Marka aad shaqeyso oo bixiso canshuurta Lambarka Bulshada, waxa aad heleysaa "dhibcaha" Lambarka Bulshada.

Tirada dhibcaha ee lagaaga baahan yahay si aad xaq ugu yeelato macaashka waxa ay ku xiran tahay sanadka aad dhalatay. Haddii aad dhalatay 1929kii ama ka dib waxa aad u baahan tahay 40 dhibcood (10 sano oo shaqo ah).

Haddii aad joojiso in aad shaqeyso ka hor inta aadan gaarin dhibco kugu filan oo aad xaq ugu yeelato macaashka, dhibcahaasi waxa ay ku jirayaan diiwaanka Lambarka Bulshada. Haddii aad dib ugu noqoto shaqada xilli dambe, waxa aad kordhin kartaa dhibcaha si aad xaq ugu yeelato. Kuma siin karno macaashka hawlgabka ilaa aad garto dhibcaha lagaaga baahan yahay.

Imisa ayuu noqonayaa macaashka hawlgabka ee aad heleyso?

Macaashka lagu siinayaa waxa uu ku saleysan yahay dakhliga ku soo galay mudadii aad shaqeyneysay. Dakhli sare oo ku soo geli jiray waxa uu keenayaa macaash badan oo lagu siiyo. Haddii ay jiraan sanado dhawr ah oo aadan shaqeyn ama dakhligaagu yaraa, lacagta macaashka ah ee aad qaadaneyso waa ay ka yaraaneysaa haddii aad si joogta ah u shaqeyn lahayd.

Macaashka lagu siinayo waxa kale oo saameyn ku yeelanaya da'da aad go'aanka ku gaarto in aad ku noqoto hawlgab. Haddii aad hawlgab ku nqoto da'da 62 (da'da ugu horeysa ee suurta galka ah ee Lambarka Bulshada, akhri halkan hoose), macaashka aad heleyso wuu ka yaraanayaa haddii aad dib ugu dhigto xilli dambe. Waxaa si faahfaahsan loogu qeexay bogga 3.

FIIRO GAAR AH: *Haddii aad tahay qof shaqeynaya oo da'diisu tahay 60 ama ka weyn oo aan qaadaneyn macaashka Lambarka Bulshada, waxaa laguu soo dirayaa Warbixinta Lambarka Bulshada sanad kasta taasoo soo koobeysa dakhligaaga. Shaqaalaha da'doodu gaartay 25 waxaa hal mar kaliya loogu soo dirayaa boostada Warbixinta. Haddii aad shaqeyso oo da'daadu tahay 18 ama ka weyn, waxa aad ka heli kartaa Warbixinta barta internetka. Waxa ay kaa caawin kartaa in aad qorsheyso xaaladaada maaliyadeed ee mustaqbalka. Waxa aad ka heleysaa diiwaan ay ku cad yihiin dakhligaaga waxayna ku siineysaa qiyaas waxa uu noqonayo macaashka da'da kala duwan ee hawlgabka. Waxa kale oo ay ku siineysaa qiyaasta macaashka haddii aad naafo daran noqoto ka hor inta aadan gaarin hawlgabka, iyo sidoo kale qiyaasta macaashka ee Lambarka Bulshada ee ay helayaan dadka leh dhaxalkaaga ee xaaskaaga/seygaaga iyo xubnaha qoyska ee xaqa u leh marka aad geeriyooto. Si aad uga arki karto barta internetka .Warbixintaada, soo booqo barta bogeenna ee* ***www.socialsecurity.gov/myaccount.***

Waxa aad ka heli kartaa qiyaasta macaashka hawlgabka

Qiyaasta aad ka heli karto shabakadda internetka waxa aad u isticaali kartaa inaad ku ogaato qiyaase adiga kuu gaar ah oo kaa caaawin kara sidii aad u qorsheyn laheyd hawlgabka. Qiyaasta hawlgabka ee barta internetka waa mid qarsoodi ah, fudud oo aad

u adeegsan karto qorsheynta waayo waxa ay meesha ka saartaa in macluumaadka aad adigu geliso. Waxa kale oo uu kuu ogolaanayaa in aad abuuri karto "maxaa dhacaya haddii" Tusaale ahaan, waxa aad bedeli kartaa "taariikhda joojinta shaqada" ama dakhliga aad fileyso in mustaqbalka uu ku soo galo ama waxa aad isbarbardhigi kartaa xilliyo kala duwan oo aad hawlgab noqoto.

Macluumaad dheeraad ka akhri *Online Retirement Estimator* (Publication No. 05-10510) ama *How To Use The Online Retirement Estimator* (Publication No. 05-10511) ama soo booqo barteena internetka ***www.socialsecurity.gov/estimator.***

Da'da hawlgabka buuxa

Haddii aad dhalatay 1944 ama ka hor, waxa aad iminkaba xaq u leedahay macaashka buuxa ee Lambarka Bulshada. Haddii aad dhalatay intii u dhaxeysay 1943 ilaa 1960 da'da aad ku heleyso macaashka hawlgabka way sii kordheysaa ilaa ay ka gaarto 67. Shaxda hoose ayaa muujineysa hawlgabka da'da buuxa ee ku saleysan taariikhda dhalashada.

Da'da lagu qaato macaashka buuxa ee Lambarka Bulshada	
Sanadka dhalashada	***Da'da hawlgabka buuxa***
1943-1954	66
1955	66 iyo 2 bilood
1956	66 iyo 4 bilood
1957	66 iyo 6 bilood
1958	66 iyo 8 bilood
1959	66 iyo 10 bilood
1960 iyo ka dib	67
FIIRO GAAR AH: *Dadka dhashay Ida Janaayo ee sanad kasta waa in tixraac ka dhigtaan sanadkii hore.*	

Hawlgabka xilli hore

Macaashka hawlgabka waxa aad qaadan kartaa xiili hore marka ay da'daadu gaarto 62. Hase yeeshee, macaashka aad qaadato hoos ayuu u dhacayaa haddii aad qaadato inta ka horeysa hawlgab buuxa.

Tusaale ahaan, haddii aad hawlgab ku noqoto da'da 62 macaashka lagu siiyo waxa uu ka yaraanayaa 25 boqolkiiba inta uu ahaan lahaa haddii aad sugi laheyd da'da hawlgab buuxa.

Dadka qaar baa shaqada joojiya ka hor da'da 62. Haddii ay sidaa yeelaan, sanadaha aan dakhli ku soo gelin waxa ay qiyaastii ka dhigan tahay macaashka Lambarka Bulshada oo hoos u dhaca marka aad noqoto hawlgab.

FIIRO GAAR AH: *Mararka qaarkood dhibaatooyin caafimaadka ayaa dadka ku qasba in ay xilli hore noqdaan hawlgab. Haddii aad shaqeyn karin dhibaato caafimaad darteed, waa in aad tixgelisaa codsashada macaashka naafada ee Lambarka Bulshada. Lacagta macaashka ee nafaada waxa ay la mid tahay lacagta buuxda oo aan la dhimin ee hawlgabka.Haddii aad qadaneyso macaashka naafada ee Lambarka Bulshada marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa, macaashkaas waxaa loo wareejinayaa macaashka hawlgabka. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa* Macaashka Naafada *(Publication No. 05-10029-SO).*

Dib u dhigidda hawlgabka

Waxa aad dooran kartaa in aad shaqeyso xitaa wixii ka dambeeya da'da hawlgabka buuxa. Haddii aad sidaa yeesho, waxa aad ku kordhin kartaa macaashkaaga Lambarka Bulshada laba siyaabood.

Sanad kasta dheeraad ah oo aad shaqeyso oo dakhli ku soo galo waxaa lagu qoraa diiwaanka Lambarka Bulshada.Dakhliga badan oo ku soo gala noloshaada waxa ay ka dhigan tahay macaash badan oo idin soo gala marka aad hawlgab noqotaan.

Sidoo kale, macaashkaaga waxa uu u kordhayaa si toos ah tiro go'an oo boqolkiiba ah tan marka aad gaarto hawlgab baxa ilaa bilowdo qaadashada macaashka ama aad gaarto 70 jir.Boqoleydaas waxa ay ku kala duwan tahay sanadka dhalatay.Tusaale ahaan, haddii aad dhalatay 1943kii ama ka dib, waxa aan sanad kasta ku dareynaa macaashka 8 boqolkiiba sanad kasta oo aad dib u dhigto qaadashada Lambarka Bulshada wixii ka dambeeya da'da hawlgabka buuxa.

FIIRO GAAR AH: *Haddii aad go'aansato in aad dib u dhigto hawlgabka, waa in aad xaqiijisaa in aad codsato Medicare marka aad 65 sano gaarto. Xaaladaha qarkood, kharashka ceymiska*

caafimaadka aad ayuu u kordhaa haddii aad dib u dhigto in aad codsato. Macluumaad kale oo ku saabsan Medicare waxa aad ka heli kartaa bogga 11.

Go'aan ka gaarista xilliga hawlgabka

Doorashada marka aad noqoneyso hawlgab waa mid muhim ah laakiin go'aan shaqsi ah. Iyadoo aan la eegin da'da aad doorato in aad ku noqoto hawlgab, waa arrin wanaagsan in aad la xiriirto Lambarka Bulshada si aad u ogaato fursadaha aad heli karto una gaarto go'aan ku saleysan macluumaadka aad hesho. Xaaladaha qaarkood, waxa aad dooran kartaa bisha aad noqoneyso hawlgab taasoo macnaheedu yahay bixinta macaashka ee adiga iyo qoyskaaga.

Gaarista go'aanka xilliga aad hawlgab noqoneyso, waxaa muhim ah in aad xusuusnaato in khubarada maaliyadda ay ku talinayaan in lagaa doonayo in 70-80 boqolkiiba ee dakhliga ku soo gala hawalgabka ka hor kuu horseedo in aad si wanaagsan u gasho xilliga hawlgabka. Maadaama lambarka bulshada u bedeli karo oo kaliya afartan boqolkiiba dakhligii ku soo geli jirey hawlgabka ka hor ee qofka caadiga ah ee shaqeeya, waxaa ,muhim ah in aad leedahay hawlgab, keyd ama maalgelin kuu gaar ah.

Waa in aad codsataa macaashka hawlgabka sadex bilood ka hor taariikhda aad dooneyso inuu macaashku kuu biloowdo. Haddii aadan diyaar u aheyn in aad hawlgab noqoto, laakiin aad ku fikireyso in aad mustaqbalka dhaw noqoto hawlgab, fadlan soo booqo kartaa bogga internetka ee kaa caawin kara qorsheynta hawlgabka ee ***www.socialsecurity.gov/retire.***

Macaashka la siiyo Haweenka iyo ragga laga geeriyoodo

Haweenka iyo ragga laga geeriyoodo waxa ay qaadan karaan macaashka Lambarka Bulshada da'da 60 jirka ama da'da 50ka haddii ay noqdaan naafo. Waxa ay qaadan karaan macaash yar oo midba u qoran oo marka dambe isu bedela macaash buuxa ee qofka kale diiwaankiisa. Tusale ahaan, qof dumar ah ayaa qaadan karta macaash yar da'da 60 ama 62 oo isu bedeli kara macaash buuxa (100 boqol) macaashka hawlgabka marka ay gaarto da'da hawlgab buuxa. Sharciyadu waa kuwo kala duwan kuna xiran xaaladda kuu gaarka ah, sidaa darteed la hadal wakiilada Lambarka Bulshada oo weydii fursadaha aad heysato.

Macaashka la siiyo xubnaha qoyska

Haddii aad qaadaneyso macaashka Lambarka Bulshada, qaar ka mid ah xubnaha qoyska ayaa qaadan kara macaashka, oo ay ka mid yihiin:

- Xaaska/seyga oo 62 jir ah ama ka weyn.
- Xaaska/seyga da'diisu ka yar tahay 62 haddii ay korinayaan ilmo ku qoran diiwaanooda oo ka yar 16 sano ama naafo ah.
- Xaaskii/saygii hore, oo 62 jir ah ama ka weyn (akhri "Benefits for a divorced spouse" ee bogga 7);
- Caruurta da'doodu tahay 18, ama ka weyn ilaa 19 haddii ay si buuxda u dhigtaan dugsiga oo weli aan dhameysan dugsiga sare; iyo
- Ilmo naafo ah, xitaa haddii ay yihiin 18 ama ka weyn.

Haddii aad noqoto waalid caruur dhalay (oo ay ka mid yihiin ilmaha aad korsaneyso) oo aad bilowdo in aad macaash qaadato, nala soo socodsii ilmaha, si aan go'aan uga gaarno in ilmuhu macaashka xaq u yeelanayo.

FIIRO GAAR AH: *Macaashka ilmaha waxaa qaata oo kaliya ilmaha aan guursan. hase yeeshee, xaaladaha qaarkood, macaashka waa la siinaya ilmo naafo ahaa oo guursaday qof naafo ahaa ilaa caruurnimadii.*

Macaashka xaaska/qoyska

Xaas/sayga aan shaqeyn ama dakhligiisu yar yahay ayaa isna xaq u yeelanaya ilaa kala bar macaashka buuxa ee qofka hawlgabka ah. Haddii aad xaq u leedahay macaashkaaga kuu gaarka ah iyo macaashka xaask/sayga, marka hore waxaanu bixineynaa macaashka adiga kuu gaarka ah. Haddii macaashka aad ku qaadato say/xaas ahaan ka badan yahay kan adiga kuu gaarka ah, waxa lagu siinayaa macaashka oo la isku daray una dhigna macashka badan ee xaaska/sayga.

Haddii aad gaartay da'da hawlgabka buuxa, oo aad xaq u leedahay macaashka xaaska/sayga ma qofkii hore ee aad kala tagteen iyo macaashkaaga kuu gaarka ah, waxa aad dooran kartaa in aad

qaadato oo kaliya macaashka xaaska/sayga oo aad sii kororsato dhibcaha hawlgabka ee Lambarka Bulshada. Ka dib waxa aad codsan kartaa macaashka xilli dambe oo aad qaadan kartaa macaash dheeraad bil kasta adiga oo ka faa'iideysanaya saameynta ka dhalatay dib u dhigista.

Haddii aad qaadaneyso macaash kale oo aad leedahay ee hawlgab oo aadan bixin canshuurta Lambarka Bulshada, waxaa suurtagal ah in la yareeyo macaashka xaaska/sayga. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hawlgabka gaarka ah ee aysan bixin Lambarka Bulshada waxa aad ka heleysaa bogga 10 ee daabacaaddan.

Haddii xaaska/sayga doonayo inuu qaato macaashka Lambarka Bulshada ka hor inta aanay gaarin da'da hawlgab buuxa, waxaa yaraanaya macaashka uu qaadanayo/daneyso. Inta ay hoos u dhaceyso waxa ay ku xiran tahay xilliga uu qof aas gaarayo da'da hawlgabka buuxa.

Tusaaale ahaan:

- Haddii da'da hawlgabka buuxa tahay 65, xaaska/sayga waxa la siinayaa macaash aan wax laga jarin oo 37.5 boqolkiiba ah marka ay da'diisa gaarto 62.
- Haddii da'da hawlgabka buuxa tahay 66, xaaska/sayga waxa la siinayaa macaash aan wax laga jarin oo 35 boqolkiiba ah marka ay da'diisa gaarto 62.
- Haddii da'da hawlgabka buuxa tahay 67, xaaska/sayga waxa la siinayaa macaash aan wax laga jarin oo 32.5 boqolkiiba ah marka ay da'diisa gaarto 62.

Macaashka uu qaadanayo way sii kordheysaa marka da'da sii korodhaba ilaa ay gaarto 50 boqolkiiba marka uu gaaro hawlgab buuxa. Haddii da'da hawlgabka buuxa ka duwan tahay tan lagu soo bandhigay halkan macaashku waxa uu noqonayaa inta u dhaxeysa 32.5 boqolkiiba iyo 37.5 boqolkiiba da'da 62.

Hase yeeshee, haddii xaaska/seyga korinayo ilmo ay da'diisu ka yar tahay 16 ama naafo ah oo uu qaato macaashka Lambarka Bulshada kuuna qoran yahay, xaaska/seygu waxa uu qaadanayaa macash buuxa, iyada oo aan loo eegin da'da.

Tusaalahan ayaa arrintan faahfaahinaya:

Gabadha la yiaahdo Marry Ann waxa ay xaq u leedahay macaash dhan $250 iyo macaashka ay ku qaadaneyso saygeeda oo ah $400. Xilliga hawlgabka buuxa, waxa ay qaadaneysaa macaashkeeda hawlgabka $250.00 waxaanan ugu dareynaa $150 ah macashka saygeeda, oo marka la isku ddaro ah $400 Haddii ay qaadato macaashkeeda hawlgabka inta aanay gaarin hawlgabka buuxa, labada lacagoodba hoos ayey u dhacayaan.

FIIRO GAAR AH: *Xaaska/sayga aad wada joogtaan ma qaadan karo macaashka xaas/say ilaa aad adigu codsato macaashka hawlgabka. Hase yeeshee, marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa, waxa aad codsan kartaa macaashka in lagaa joojiyo bixintiisa. Sidaas, xaaskaaga/seygaaga waxa uu ku qaadan karaa macaashka adiguna waxaa aad keydsan kartaa dhibco dheeraad ah ilaa ay da'daadu gaarto 70. Hal qof ayaa codsan kara macaashka xaaska/seyga.*

Macaashka ugu badan ee qoyska

Haddii caruurtaada xaq u leeyihiin Lambarka Bulshada, mid walba waxa uu qaadanayaa kala bar macaashka buuxa. Laakiin waxaa jira xad u go'an lacagta adiga iyo qoyskaaga la siinayo — inta badan 150-180 boqolkiiba inta aad adiga lagu siinayo. Haddii lacagta la siinayo xaaska/sayga iyo caruurta ay ka badato xadka u go'an, hoos ayaa loo dhigayaa. Taasi saameyn kuma yeelaneyso macaashkaaga.

Macaashka xaaska/sayga kala tagay

Xaaska/sayga aad kala tagteen waxa uu qaadan karaa macaashkaaga Lambarka Bulshada haddii aad is qabteen ugu yaraan 10 sano. Xaaska/sayga aad kala tagteen waa yahay 62 ama ka weyn.

Macaashka isaga ama iyada la siiyo wax saameyn ah kuma yeelanayo macaashka aad qaadato ama la siiyo xaaska aad iminka wada joogtaan.

Sidoo kale, adiga iyo xaaskii hore ee aad kala tagteen ugu yaraan laba sano oo adiga iyo xaaskaagii hore aad ugu yaraan 62 jir tihiin oo macashka uu qaadan karo macaashka haddii aadan noqon hawlgab.

Waxyaabaha aad dooneyso in aad ogaato xilliga aad xaqa u leedahay macaashka hawlgabka

Sidee ayaa loo codsadaa Lambarka Bulshada?

Waxa aad codsiga macaashka ku soo gudbin kartaa shabakadda internetka ee ***www.socialsecurity.gov*** ama waxa aad soo wici kartaa lambarkeena lacag la'aanta ah, **1-800-772-1213**. Ama waxa aad balan ka sameysan kartaa si aad u soo booqato xafiisyadeena Lambarka Bulshada oo aad adiga shaqsi ahaan u codsato.

Iyada oo hadba ku xiran xaaladaada, waxa aad u baahaneysaa qaar ama dhamaan aqoonsiyada hoos ku xusanb. laakiin dib ha u dhigin codsiga macaashka haddii aadan heysan dhamaan macluumaadka lagaa doonayo. Haddii aadan laheyn dokumeentiga aad u baahan tahay, waan kaa caawineytnaa sidii aad ku heli laheyd.

Macluumaadka lagaaga baahan yahay:

- Lambarkaaga Bulshada;
- Shaahadaada dhalashada;
- Foomka W-2 ama canshuurtii aad xareysay sanadkii hore haddii aad iskaa u shaqeysato.
- Warqadaha lagaaga saaray ciidamada haddii aad ka tirsaneyd ciidamada; iyo
- Shahaadada dhalashada ee xaaskaaga/seygaaga iyo Lambarka Bulshada haddii uu isaga ama iyada uu codsanayo macaash ku saleysan dakhligii ku soo galay.;
- Shahaadada dhalashada ilmahaaga iyo Lambarkooda Bulshada haddii aad ilmahaaga u codsaneyso macaashka;
- Caddeynta dhalashada Mareynkankaa ama sharciga aad wadanka ku joogto hadii adiga (ama xaaska/seyga ama caruurta aad macaashka u codsaneyso) aysan ku dhalan Mareykanka.
- Magaca bangiyada, lambarka xisaabta iyo lambarka ee bangiga (routing number), si macaashka si toos ah loogu shubo xisaabtaada bankiga .Haddii aadan laheyn xisaab bangi ama aad doorbideyso in laguugu soo diro kaarka bankiga, waa in aad iska diiwaan gelisaa barnaamijka Direct Express® Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, soo booqo ***www.GoDirect.org***.

Waxaanu dooneynaa in aan aragno asalka dokumeentiga ama nuqul ay shaabad ku dhufteen xafiiska asalku ka soo baxay. Boostada ayaad ku soo diri kartaa ama keeni kartaa xafiiska Lambarka Bulshada. Waxaan ka sameyneynaa nuqul oo kuu soo celineynaa asalka.

Xaqa aad u leedahay Racfaanka

Haddii aad nagu diidan tahay go'aanka aan ka gaarno codsigaaga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Faahfaahin ku saabsan talaabooyinka aad qaadi karto, akhri *Nidaamka Racfaan ka Qaadashada* (Publication No. 05-10041-SO).

Waad diyaarin kartaa racfaankaaga inaga oo lacag la'aan kugu caawineyna ama waxa aad sameysan kartaa wakiil ku caawiya. Waxaanu ku siineynaa macluumaadka hay'adaha aad ka heli karto caawinaad si ay wakiil kaaga noqdaaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada wakiilka, akhri *Xaqa Aad U Leedahay Wakiil* (Publication No. 05-10075-SO).

Haddii aad shaqeyneyso oo isla markaana aad qaadaneyso macaash

Waad shaqeyn karta oo qaadan kartaa macaashka hawlgabka. Dakhliga ku soo gala (ama ka dib) bisha aad gaarto hawlgab buuxa ma yareeynayno macaashka kaa soo gala Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, macaashkaagu wuu yaraanayaa haddii dakhliga ku soo galo ka badato xadka u go'an bilaha ka horeeya inta aadan gaarin da'da hawlgabka buuxa. (Akhri Jadwalka 1 si aad u ogaato da'a aad ku gaareyso hawlgab buuxa.)

Sidan weeye sida ay u shaqeyso:

Haddii aad shaqeyso laakiin aad bilowdo in aad qaadato macaash ka hor da'da hawlgabka buuxa $1 ee macaash ah waxaa loo goynayaa $2 kasta ee dakhliga shaqada kaa soo gala wixii ka sareeya lacagta u go'an sanadkii.

Sanadka aad gaarto hawlgabka buuxa, $1 ee macaash ah waxaa loo goynayaa $3 kasta ee dakhliga shaqada kaa soo galaya wixii ka sareeya lacagta u go'an sanadkii. Marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa, waad sii shaqeyn kartaa iyada oo macaashka aad ka qaadato Lambarka Bulshada aan la yareyn dakhli kasta oo ku soo gala.

Haddii, inta lagu jiro sanadka, dakhligaaga uu ka yar yahay ama ka hooseeyo sida aad qiyaastay, na soo wargeli sida ugu dhaqsaha badan si aan wax uga bedelno macaashkaaga.

Haddii aad doneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida dakhligaagu saameyn ugu yeelanayo macaashkaaga hawkgabka, akhri *Sidee Ayaa Shaqadu Saameyn Ugu Yeeleneysaa Macaashka* (Publication No. 05-10069-SO), kaas oo iminka leh xadka ugu badan ee aad sameyn karto bil kasta iyo sanad kasta.

Sharciyada gaarka ee bisha

Sharciyo gaar ah ayaa loo adeegsanayaa dakhliga ku soo gala hal sano, inta badan sanadka ugu horeeya ee hawlgabka. Sida uu dhigayo sharcigaan, waxa aad qaadan kartaa lacagta macaashka bil kasta oo dakhli ku soo galo iyada oo la eegayo xad go'an, iyada oo aan la tixgelin dakhliga ku soo gala sanadka.

Haddii aad doneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida dakhligaagu saameyn ugu yeelanayo macaashkaaga hawkgabka, akhri *Sidee Ayaa Shaqadu Saameyn Ugu Yeeleneysaa Macaashka* (Publication No. 05-10069-SO), kaas oo iminka leh xadka ugu badan ee aad sameyn karto bil kasta iyo sanad kasta.

Waxaa suurtagal ah in macaashka lagu siiyo laga jaro canshuur

Sadex meel oo meel dadka qaata macaashka Lambarka Bulshada waxa ay ka bixiyaan casnhuur macaashkooda.

- Hadii aad canshuurtaada "qof" ahaan u xareyso oo dakhligaaga* oo la isu geeyay uu dhaxeeyo $25,000 iyo $34,000, waxaa laga yaabaa in aad canshuur ka bixiso 50 boqlkiiba macashka Lambarka Bulshada. Haddii dakhligaaga* oo la isu geeyey ka badan yahay $34,000, ilaa 85 boqolkiiba macaashka Lambarka Bulshada ayaa lagaa canshuurayaa.
- Haddii aad canshuurta si wadajir ah u xareysaan, waxaa suutagal ah in aad canshuurta bixiso macaashka 50 boqolkiiba haddii dakhliga labadiina idin soo gala oo la isu geeyey u dhaxeeyo $32,000 iyo $44,000. Haddii dakhligaaga* oo la isu geeyey ka badan yahay $44,000, ilaa 85 boqolkiiba macaashka Lambarka Bulshada ayaa lagaa canshuurayaa.

- Haddii aad xaas tahay oo aad canshuurta gooni u xareyso, waxa ay u badan tahay in aad canshuur ka bixineyso macaashkaaga.

Dhamaadka sanad kasta, waxaan idiin soo direynaa warbixinta *Social Security Benefit Statement* (Form SSA-1099) oo ay ku cad yihiin macaashka lagu siiyey. Warbixintaas ayaa u adeegsan kartaa xareynta canshuurta si aad u ogaato haddii lagaa doonayo in aad canshuur ka bixiso macaashka.

Inkastoo aan lagaa dooneyn in canshuur lagaa jaro, waxaa laga yaabaa in ay kuu fududahay in aad rubuc kasta bixiso qiyaasta canshuurta ee laaga doonayo.

Macluumaad dheeraad la xiriir lambarka lacag la'aanta ah ee Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS), **1-800-829-3676**, to ask for Publication 554, *Tax Guide for Seniors*, iyo Publication 915, *Social Security And Equivalent Railroad Retirement Benefits*.

**Foomka casnhuurta ee 1040, ee "dakhliga la isu geeyey" waa wadarta lacagta ku soo gashay oo lagu daray dulsaarka aan la canshuurin oo lagu daray kala bar macaashka Lambarka Bulshada.*

Macaashka kale ee shaqada ee aan aheyn kan Lambarka Bulshada

Haddii aad qaadato macaash lagaa siiyo shaqada oo aad bixiso canshuurta Lambarka Bulshada, macaashkaasi saameyn kuma yeelanayo macaashka Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, haddii aad shaqada ka hesho macaash laakiin aan ku tirsaneyn macaashka Lambarka Bulshada — tusaale ahaan, shaqaalaha madaniga ah ee dawladda dhexe, shaqaalaha dawladda ee gobolada ama degaanka ama shaqada wadamada dibadda — waxaa suurtagal ah in hoos loo yareeyo macaashka Lambarka Bulshada.

Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa *Government Pension Offset* (Publication No. 05-10007), shaqaalaha dawladda ee laga yaabo in ay xaq u yeeshaan macaashka Lambarka Bulshada ee dakhliga soo gala xaaska/sayga u qoran; iyo *Windfall Elimination Provision* (Publication No. 05-10045), oo loogu talo galay dadka ka shaqeeya wadamada dibadda ama shaqaalaha dawladda ee xaqa u yeesha macaashkooda Lambarka Bulshada ee u gaarka ah.

Ka safridda Mareykanka

Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka, waad u safri kartaa oo ku noolaan kartaa wadamada dibadda iyada oo aanay wax saameyn ah ku yeelan macaashka Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, waxaa jira wadamo aynaan kuugu soo diri karin macaashka Lambarka Bulshada. Wadamadaas waxaa ka mid ah Cambodia, Cuba, North Korea, Vietnam and meelo ka tirsan dawladihii hore ee Midowga Soofiyeeti (oo aan ka aheyn Armenia, Estonia, Latvia, Lithuania iyo Russia). Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in xaalado gaar ah loo tixgelin karo dadka qaata macaashka ee ku nool wadamada aan aheyn Kuuba iyo Kuuriyada Waqooyi. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladahaas gaarka ah, la xiriir xafiiska degaanka ee Lambarka Bulshada.

Haddii aad ka shaqeyso meel ka baxsan Mareykanka, sharciyo gaar ah ayaa loo adeegsadaa in aad qaadan karto macaashka.

Macluumaad dheeraad ka akhri *Your Payments While You Are Outside The United States* (Publication No. 05-10137).

Fariin ku saabsan Medicare

Medicare waa ceymiska caafimaadka ee dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn tahay. Dadka naafada ah ama kelyahoodu aaneey shaqeyneyn ayaa la siiyaa da'a kasta oo ay jiraan.

Medicare waxa ay leedahay afar qeybood

- Ceymiska isbitaalka (Qeybta A) waxa uu caawiyaa bukaanka ku jira isbitaalka iyo adeegga xiga qaarkiis,
- Ceymiska cafimaadka (Qeybta B) waxa ay bixisaa adeegga dhakhtarka, bukaanka soo booqda isbitaalka ama adeegga kale ee caafimaadka.
- Medicare Advantage plans (Qeybta C) waxa soo jirtay sanado badan. Dadka heysta caafimaadka Qeybta A and B waxa ay u dooran karaan in ay isaga bixiyaan dhamaan adeegooda caafimaadka iyada oo u sii maraya hay'ad adeegga u qabata sida ku cad Qeybta C.
- Bixinta kharashka daawada (Qeybta D) waxa ay bixisaa daawada dhakhtarka ee loo qoro daaweynta bukaanka.

Haddii aad qaadaneyso macaashka Lambarka Bulshada marka ay da'daadu gaarto 65, ceymiska caafimaadka ee medicare (Qeybta A) si toos ah ayey u bilaabataa. Haddii aad ku nooshahay Mareykanka waxaa inta badan si toos lagaaga diiwaan gelinayaa ceymiska caafimaadka (Qeybta B).

FIIRO GAAR AH: *Dadka ku nool Puerto Rico ama wadamada dibadda si toos ah loogama diiwaan gelinayo Qeybta B.Waa in ay doortaan macaashkan.*

Haddii aad qaadaneyso macaashka Lambarka Bulshada, waa in aad nala soo xiriirtaa ka hor inta aanay da'daadu ku buuxsamin 65 si aad u codsato Medicare. Waad codsan kartaa Medicare xitaa haddii aadan ku talo jirin in aad hawlgab ku noqoto 65. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa *Medicare* (Publication No. 05-10043-SO).

Bixinta kharashka ee Medicare ay ku caawiso dadka dakhligoodu hooseeyo

Haddaii dakhligaagu hooseeyo hantidaaduna yar tahay, gobolka aad degan tahay ayaa laga yaabaa inuu bixiyo lacagta ceymiska, xaaladaha qaarkood, sida kharashka caafimaadka "kan aad jeebkaaga" ka bixiso, lacagta kugu beegantay iyo qeybta ceymiska ee aad iska bixisay.

Gobolkaaga oo kaliya ayaa go'aan ka gaari kara in aad xaq u leedahay Barnaamijkan Keydka ee Medicare. Si aad u ogaato in aad xaq u leedahay, la xiriir gobolka iyo gargaarka caafimaadka ee degaanka (Medicaid), xafiiska adeegga dadweynaha.

"Caawinaad dheeraad" oo lagaa caawiyo daawada dhakhtarku qoro ee Medicare

Haddii dakhligaagu iyo hantidaadu kooban yahay (kuna go'an yahay heerka faqriga ee dawladda dhexe), waxaa suurtagal in aad xaq u yeelato caawinaad dheeraad ah oo aad isaga bixiso daawada laguu qoro sida ku xusan Medicare D. Doorka Lambarka Bulshada ee barnaamijkan waa:

- In lagu fahamsiiyo sida aad xaq ugu yeelan karto;
- In aad buuxiso codsiga caawinaada dheeraadka ah; iyo

- In laga shaqeeyo codsigaaga.

Haddii aad codsao caawinaad dheeraad ah, waxaanu bilaabeynaa codsiga Barnaamijka Keydka ee Medicare, ilaa aad adigu diido oo aad noo sheegto in aynaan bilaabin. Si aad u ogaato in aad xaq u leedahay ama aad u codsato, la soo xiriir lambarka lacag la'aanta ah ee bulshada ama soo booqo barta internetka ***www.socialsecurity.gov/extrahelp.***

www.socialsecurity.gov

Social Security Administration
SSA Publication No. 05-10035-SO
Retirement Benefits (Somali)
July 2012